# Wakiilka Gaarka ah ee Xoghayaha Guue ee Qaramada Midoobey u qaabilsan Soomaaliya, Michael Keating, oo Golaha Ammaanka u Xog-warramay

Addis Ababa, 28 Jannaayo 2016

Mudane Madaxweyne, waxaan ku faraxsanahay inaan idin la hadlo anoo muddo gaaban magacaaban. Farxad ayey ii tahay inaan idiin xog-warramo adinka iyo Danjire Madeira oo jagada hayey laga soo billaabo Diseembar 2015 – muddadaas oo ah mid dheer marka aniga la ii fiiriyo.inta aanan billaabin, ii ogolow inaan bogaadiyo ninkii xilka iiga horreeyey ee Nicholas Kay, kaas oo igu wareejiyey hawl isku dubbaridan. Guud ahaan hawlwadeennadeyda Muqdisho – haddii ay noqon lahaayeen Soomaali iyo caalami, Midowga Afrika (AU) iyo Qaramada Midoobey (QM) – waxay ka marag kaceen doorka xusidda mudan ee ay asaga iyo kooxdiisu ciyaareen labadii sano iyo barkii la soo dhaafay. Waxaa kaloo ammaan mudan beesha caalamka iyo golahan oo iyaguna door hormuud ah ku lahaa Soomaaliya sannado badan oo tagey. Midnimada goluhu waxay sharuud lamahuraan ah u tahay horumarka Soomaaliya ka jira. Waxaana quuddareynayaain aan si dhow idiin la shaqeyn doono.

Mudane Madaxweyne, aan ku billaabo xoogaa aaraada kowaad. Waxaan nasiib u yeeshay inaan wakhti kooban oo dhallinyaronimadeydi ah ku soo qaatay Soomaaliya, xilli magaalada Muqdisho ahayd mid shidan oo bulaaleysa, iyo mar kale Sagaashameeyadii oo ay qalalaase gondaha kula jirtey. Labadii todobaad aan wakiilka ahaa ma ahayn kuwii Soomaaliya ugu fududaa – waxaana hareeyey wada-xaajood siyaasadeed oo aad u adag oo ay sii murjiyeen labo weerar oo argagixisonimo. Hadana, Soomaaliyada aan arko maanta waxay ayaa xasuustayda carruurnimo uga dhow urugadii dagaallada sokeeye. Waa dal yididiile weyn uu ka muuqdo, oo leh dad dhiirranaan iyo hal-abuur shaqo isku darsaday, haddana lugu manneystay khayraad dabiici ah oo aad u ballaaran, islamarkaana ku yaal goob loo xisho oo leh illin dabiici ah. Soomaalida qudhoodu wey garowsan yihiin hibadooda, cid hiigsiga himiladooda ka duwi kartana ma jirto. Ka dib weerarro fool-xun oo lugu qaaddey Ceel Cadde iyo xeebta Liido, dareenkoodu waxba iskama beddelin ee wuu sii labo lixaadsay. Waxaan kaloo bogaadinayaa geesinimada iyo hal-adayga AMISOM iyo ciidamadooda, iyo sidoo kale dhiirranaanta dadka Soomaaliyeed. Kenya waxay dhankeeda wacad ku martay in weerarrada lugu qaaday ciidamadeedu aysan hor joogsaneyn. Sidaas si la mid ah, ficillada gurracan ee Al-Shabaab ma baqdin gelinayaan Soomaalida, kamana duwayaan yoolashooda nololeed. Tan micnaheedu maaha in la dhayalsado caqabadaha naha horreeya. Laakiin maadaama aan galeyno xilli xaasaasi u ah isbeddelka dalka ku soo fool leh, horumarka Soomaaliya ka hanaqaaday wuu sii socon doonaa. Taasina waxay u baahan tahay hoggaan Soomaaliyeed iyo taageerada joogtada ah ee golahan.

Mudane Madaxweyne, guul ay Soomaaliya ku tillaabsato 2016-ku, waxay ku xirnaan doontaa sida loola tacaalo hadimooyinka taagan, oo laga xusi karo tan Al-Shabaab, iyo in laga faa'ideysto fursadaha ay horumarka siyaasaddu la imaanayso.

Mudane Madaxweyne, xaaladda ammaanku meel adag ayey mareysaa. Taas waxaa si faahfaahsan uga hadli doona Wakiilka Guddoomiyaha Midowga Afrika, abaal weyn ayaana uga haynaa geesinimada iyo hal-adayga AMISOM iyo ciidamadoodu ay muujiyeen.

Ammaanka Soomaaliya wuxuu u baahan yahay in lugu wajaho abbaar dhammeystiran. Sida uu Xogahaya Guud ku tilmaamay Qorshe Hawleedka Ka-hortagga Xagjirnimada Handadaadda leh, horumarka iyo xaquuqda aadanahu waa in ay wada socdaan. Hawlgallada militariga iyo la dagaallanka argagixisada waxaa loo baahan yahay in ay hareer socdaan dadaallo xoog leh oo dhanka nabadsugid iyo dhaqangelinta sharciga ku aadden. Waa in mudnaan gaar ah la siiyaa tayeynta dowladda federaalka ah iyo maamul goboleedyada Soomaaliya ka jira, si ay ugu fillaadaan hanashada ammaanka iyo kala dambeynta dalka, marka uu dhammaado xilliga joogitaanka AMISOM. Tanna waxaa loo baahan yahay in lugu kabo hawlo lugu xoojinayo hay'adaha dalka, shaqooyin laga abuuro shirkadaha gaarka ah islamarkaana la yareeyo ku tiirsanaanta gargaarka bini'aadamnimo.

Mudane Madaxweyne, arrinta ammaanku waa mid walaaceeda leh. Shacab iyo ciidan aad u badan ayaa la'anaya. Al Shabab weli waa khatar tag leh. Waxaa i dhiirrigelinaya ballanqaadkii uu bishii Setembar ee kal hore sameeyey Madaxweyne Xasan, kaas oo la xiriirey dib-u-habeyn lugu sameeyo aagga amniga, sida in si buuxda loo qooraansado aaggan, habka mushaaraadka oo laga dhigo mid joogto ah, wax-ku-ool ah islamarkaana loo adeegsado hannaan danabeysan oo aqoonsi iyo maamul mideysan leh. UNSOM iyo bahwadaagteedu waxay diyaar u yihiin in ay gacan ka geystaan hirgelinta hindisahan. Dowladda Federaalka ah waxay iminka ku hawlan tahay diyaarinta Siyaasadda Amniga Qaranka, kaas oo baahi deg-deg ah loo qabo. Meelmarinta nashqadda ammaanka qaranka waa in lugu kabo abuurista hay'ado boolis, garsoor iyo asluub ku dhisan oo hannaan sugan oo dalka ka wada hanaqaada, marka laga shidaal qaato nidaamka federaalka. Waxaan ku rajo weynahay in aan aragno horumar laga sameeyo arrimahan isku qoofalan, ka hor Madasha Bahwadaagta Heerka Sare ee lugu qabanayo magaalada Istanbul.

Mudane Madaxweyne, xaaladda bini'aadamnimo waa mid aad looga welwelo qabo, arrimaha sababa xasaradaha daba-dheeraaday ee Soomaaliya ka aloosanna weli xal waafi lagama gaarin. Malaayiin carruur, haween iyo dad waayeel ah ayaa la daalaa dhacaya tabaale nugleeyey, dad wadartoodu gaareyso 4.9 million, oo ka dhigan 40% dadweynaha guud ee Soomaaliyeed ayaa u baahan gargaar aadaminimo. Tiro kor dhaafeysa 1.1 milyan oo ruux ayaa dalka gudahiisa ku barakacay, Carruur gaaraysa 300,000 oo da'doodu 5 sano ka yar tahay ayaa nafaqo darro la liita, halka malaayiin kalena aysan daryeel caafimaad oo aas-aasi ah, biyo iyo naddaafad.

Kooxda Aadaminimada Dalka Soomaliya dhawaan waxay billaabeen qorshaha jawaabta bini'aadamnimada 2016 oo ku kacaya adduun dhan $885 milyan si loogu bedbaadiyo nolosha, loo taabbageliyo haynta, loo hagaajiyo galaangalka adeegga aas-aasiga ah, islamarkaana loo ilaaliyo bulshada nugul, sida in xal waara loo raadiyo dadka gudaha dalka ku barakacay. Ujeeddooyinkan baahsan waxaa loogu talogalay in lugu beegsado baahida deg-deg ah, sidoo kalena loo dhiso adkeysiga, iyo in la yareeyo ku tiirsanaanta gargaarka bini'aadamnimo. Waxayse u baahan tahay in si deeqsinimo leh loo taageero.

Mudane Madaxweyne, dhammaan sharuudaheennu waxay ku xiran yihiin in siyaasadda la saxo. Bishii Nofembar ee la soo dhaafay, kumannaan Soomaali ah ayaa ka qaybgalay madal wadatashi qaran. Tani waxay muujisay tillaabo loo qaaday dhanka dimuqraadiyadda: wadatashiyo aan mugdi ku jirin loona wada dhan yahay oo laga yeesho hannaanka cusub ee doorarashada 2016, ku waas oo ay ka dhex muuqdaan haweeenka, dhallinyarada iyo dadka laga tirade badan yahay.

Baaqii Muqdisho ee 16-kii Disembar wuxuu qeexay mabaa'dii muhiim ah, sida wakhti xadidan, tayada geeddi-socodka doorashooyinka iyo ka qaybgalka haweenka iyo dhallinyarada.

Mudane Madaxweyne, waxaa si gaara ii farxadgelinaya in aan idin la wadaago warar deg-deg ah. Saaka, golaha wasiirradu waxay isla gaareen go'aan la xiriira hannaanka la isticmaalayo doorashada sannadka soo socda. Tani waxay ku soo beegmeysaa gunaanudka lix bilood oo wadahadallo xooggan ah, waxayna ka dhigan tahay guul siyaasadeed laga gaarey nidaamka federaaliga. Dowladda federaalka ah ee Soomaaliya waxay qaadatay go'aamo dhaxalgal ah.

Hoggaamiyeyaasha gobollada Soomaaliya, inkasta oo xarig-joogsi uu ka dhexeeyo, haddana waxay garowsan yihiin ahmiyadda arrintani leedahay, iyagoo xilligan aan idin la hadlayo waxay ku mashquulsan yihiin sidii ay iskula meel dhigi lahaayeen go'aamo dhaxalgal u ah fulinta hannaanka doorashada dalka. Ka dib kulamo in muddo ah soo jiitamayey oo madaxda Soomaalidu ku yeesheen magaalooyinka Muqdisho iyo Kismaayo, hoggaamiyeyaasha dowladda Federaalka ah waxay garowsadeen in danta qaranku dalbaneyso in horay loo socdo. Hannaanka cusub wuxuu dhigayaa in Aqalka Hoose oo baarlamaanka oo ka koobana 275 xubnood, ku waas oo lugu soo xulayo qaab ku saleysan awood qaybsiga beelaha ee 4.5, iyo Aqal Sare oo ka kooban 54 xubnood oo si siman loogu qaybinayo maamullada jira, marka laga reebo Somaliland iyo Puntland oo sed bursiimo la siin doono.

Hannaanka waa mid Soomaalidu la timid, iskana leedahay. Midnimada taageerada beesha caalamka ee go'aankan la xiriirana wuxuu ahaa mid ammaan mudan. Bahwadaagta caalamiga ah waxay u baahan yihiin in ay la shaqeeyaan dhammaan saamileyda Soomaalida, si loo xaqiijiyo in wakhtigii loogu talogalay loo fuliyo. Waxaana rajeynayaa in golaha ammaanku igu taageeri doono isku daygaas.

Mudane Madaxweyne, go'aankan taariikhiga ah wuxuu muujinayaa guul weyn oo Soomaaliya ku tillaabsatay, gaar ahaan Dowladda Federaalka ah iyo madaxda maamullada xubnaha ka ah. Waxaase jira hawlo badan oo weli na horyaal, waddaduna wey dheeraan doontaa. Waxaa mashaqo ka taagan tahay faahfaahinta la xiriirta sida loo fulinayo hannaanka doorashada iyo xaqiijinta heshiis laga gaaro dhabbaha siyaasadeed ee lugu gaarayo 2016 illaa 2020-ka, si looga lib keeno rajada laga qabo in doorasho qof iyo cod ah ay dalka ka dhacdo sannadka 2020. Si taas loo gaarana, waa in aan ku gooshnaa jid caqabado badan ku gudban yihiin. Dhaqamada qaswadenimada waa in la xakameeyaa. Waana in aan u diyaargarownaa sidii aan taageero ugu fidin lahayn hoggaamiyeyaasha federaalka iyo kuwa gobollada.

Mudane Madaxweyne, Fursad dhab ah ayaa laga gaari karaa horumarka maanta lugu tillaabsaday. Waana in tani horseed u noqotaa dhaqdhaqaaqyo kale oo siyaasaddeed. Waxaan soo dhaweynayaa bilashada geeddi-socodka maamul u sameynta gobollada Hiiraan iyo shabeellaha Dhexe ee furmay 12-kii Jannaayo. Marka ay hawshaas dhammaato – sidoo kalena aayaha Muqdisho/Banaadir la isla meel dhigana – qariidadda Soomaaliyada federaalka ah wuu dhammeystiran yahay. Horumar ayaa bilihii la soo dhaafay laga sameeyey dadaallada dib loogu eegayo Dastuurka Soomaaliya. Dib-u-eegis lugu sameeyey toban ka mid ah shan iyo tobanka cutub ee uu ka kooban yahay ayaa la soo gebagabeeyey, arrimaha siyaasadda ku lugta leh ee u baahan in laga wada hadlana way cad yihiin.

Hannaanka faderaaleyntu waa in uusan noqon layli farsamo oo kor illaa hoos ah: si uu u miro dhalo muddada dheer, waa in uu noqdaa mid ay dadka Soomaaliyeed oo dhan saami ku wada leeyihiin.

Waxaa jira arrimo badan oo ka dhiman in la xaqiijiyo midnimo iyo dib-u-heshiisiin. Waxaan ka walaacsanahay in xorriyadda hadalka iyo aragtida faragelin lugu sameeyey bilihii la soo dhaafay, waxaana ugu baaqayaa mas'uuliyiintu in ay xurmeeyaan xorriyaddan.

Mudane Madaxweyne, Danjire Madeira iyo anigu waxaan quuddareyneynaa in aan dhidibada u aasno xiriir wadashaqeyn dhow oo dhex mara Qaramada Midoobey iyo Midowga Afrika oo dhulka ka hirgala. Sida ku cad qaraarka tirsigiisu yahay 2245, waxaan qaban doonnaa Madal Xiriirisa Hoggaanka Sare UNSOM, AMISOM iyo UNSOS si looga xaajoodo mudnaanteenna hawlgal iyo mid istiraatijiyadeed ee isa suran. Waxaa naga go'an in aan si buuxda uga wada faa'ideysanno abuurista UNSOS, iyo fursadaha ku jira isfaham iyo isku-xirnaan intan ka badan oo dhex marta labada dhinac. Waxaan wadaagnaa Siyaasadda Gudashada Xaquuqda Aadanaha oo ka mid ah arrimaha muhiimka ah ee lugu hubinayo isla xisaabtan dhab ah oo lala yeesho hawlgallada military ee goobaha xasaraduhu ka oogan yihiin.

Mudane madaxweyne, sida aan halkaan ku caddeeyey, caqabaduhu wey bdan yihiin. Bilaha soo socdana waxaan la kulmi doonaa hoggaamiyeyaasha Soomaalida, bulshada rayidka ah, iyo beesha caalamka si taageero isku duuban loola garab istaago arrimaha siyaasadda, ammaanka, horumarka, iyo xaquuqda aadanaha oo udub dhexaad u ah hayaanka Soomaaliya. Arrinta farxadda lehse waxay tahay, in xamaasadda siyaasaddu ay meesha ka saartay hab-dhaqankii ku saleysnaa in qalalaase xal lugu doono. Taas beddelkeedana waxaa muuqda yididiilo cusub oo dad badan ku xambaaratay in ay xurgudtii dhex taallay meel iska dhigaan oo ay maslaxad guud ku midoobaan.

Haddii aan soo gunaanudo qudbaddeyda, waxaan qirayaa in midnimada Golaha Ammaanka iyo isfahamka guud ee beesha caalamku ay Qaramada Midoobey iyo Midowga Afrikaba siineyso saldhi xoog leh oo uu gacan uga geysan karo yagleelidda mustaqbalka Soomaaliya

Mahadsanidiin.